

**Xeerka Sharci 31 Disember 1956 lamba. 6 rep  
Canshuur dheeraada oo la saaray Dawladaha Hoose ee Majeerteenya oo ku saabsan  
dhoofinta maydiga.**

**MAAMULAHA**

Marka uu garowsaday baahida iyo deg-degga loo qabo jidaynta canshuur dheeraada oo la siinayo Dawladaha Hoose ee Majeerteenya, iyo haqabtirka cilladaha miisaaniyaddooda;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

Iyo soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Maaliyadda iyo waafqsananta Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha;

Markuu arkay tixgaliyay awoodda uu siinayo qod. 8 ee Amarka 5 Jannaayo 1956, lamba. 5.

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Waxaa loo abuuray Dawladaha Hoose ee Majeerteenya canshuur dheeraada oo ah boqolkiiba saddex qiimaha maydiga marka laga la dhoofinayo Xaafiisyada dekadaha Majeerteenya. Dheeraadka la soo sheegay waxaa la qaadayaa iyadoo lagu darayo canshuurtii kastanka laga dhoofinayo wax soo saarka oo lagu shubayo cutubka lamba. 25 kucelis daqliga miisaaniyadda ee hawlgalka maaliyadeed ee sanadka 1957 oo lagu dhisay qaraarkaan.

**Qod. 2**

Lacagaha la soo rogay si waafaqsan Qod. 1, waxaa la qaadayaa dhammadka saddex biloodle kasta, iyadoo la gaarsiinayo lagu siyaadinayo cutubkaa 5 ee kharashka miisaaniyadda hawlgalka maliyadeed ee 1957 iyado lagu samaynayo dekereeto wax looga baddalayo miisaaniyadda Wasiirka Arrimaha Maaliyadda.

Qaybinta lacagta la siinayo mid kasta oo ka mida dawlad hoose oo dan ka leh waxaa lagu qabanayaa saddex biloodlaha qaraar uu soo saaro Wasiirka Arrimaha Gudaha marka uu arkay talada Guddoomiyaha Gobolka Majeerteenya oo uu la socdo kharashka raacaya cutubka 5.

**Qod. 3**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa taariikhda lagu baahiyo Faafinta Rasmiga waxaana la horgeeynayaa Golaha Xeer Dejinta si xeer loogu badalo.

Muqdisho, 31 December 1956.

Maamulaha

**P. Franca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Muuse Boqor**

**Salaad Cabdi Maxamuud**

**Xaaji Faarax Cali Cumar**

Lagu sugay lamba. 786 31 Disember 1956.

Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La sugay lana Diiwaangeliya – Diw. lamba. 21 – bogga lamba. 149.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**